‘Child safe’
Dhimista denbi-falka carruurta lagu hayo…’

Hab-waxqabad Boolisku fasaxay = Police Approved scheme

Tilmaan waalidka iyo Daryeelayaasha loogu tala galay

Warbixinta buugyarahan ku taal qaar ka mid ah ayaa galmo si cad uga hadasha. Waalidiintu waxay u arki karaan inaanay akhriskiisu carruurta ku habboonayn.

Waxaa tageersan: Hay’ada Bristol safeguarding Children Board

Waa shay aad u adag inaan laga muujin baqdin ama cabsi marka buugyarahan la akhriyayo.
Ku xadgudubka ilmuhu waa mid isku dhafan oo xasaasi ku ah dhammaan dadkaas hawlaha carruuraha ku jira. Waalidinta qaar baa go'aansada inaanay ilmahooda ku dhici Karin, kuwa kalena waxay u cabsadaan badbaadadda ilmahooda markastoo uu ilmahaasi hoyga ka baxo. Wax kastaba afkaartadu ha ahaatee, nadigii ama hay'adii warbixintan ku siisay waxay aaminsanyihin in badbaadinta ilmhaagu aad muhiim u tahay. Tanoo ka qayb ah xeerka 'badbadinta ilmaha' waxaa lagugu dhiirrigelinayaa inaad shaqaalha su'aalo weydiisid iyo inaad marmar timaadid goobta adeegga si aad u ogaatid waxa dhacaya. Tan samaynteeda baan kugula talinayaa.
Hadday tahay in bulshadu noqoto habka aan wada rabno inay noqoto mustaqbalka. , ee koritaanka carruurteena bii'o cabsi ka madhan tahay, taa daadihinteedu waa mid aad muhiim u ah.

Gabby Logan

1 Ka badbaadinta carruurtada ku xadgudubka

Waalidiin badan ayaa carruurtooda werwer ka qaba, inay xadgudub la kulmaan kolkayna arkayn – sida markay isboortiga dheelayaan ama ka qayb qaadanayaan dhacdooyinka hoyga ka baxsan. Tilmaantan waxaa loo qoray inay kaa caawiso badbaadinta carruurtaada markay ka qayb qaadanayaan goob-kulamada dheelista iyo kooxahaas. Waxaa markii hore qoraalkan diyaarshay laanta booliska [Avon and Somerset Constabulary] waa qayb ka mid ah macluumaadka badbaadinta ilmaha loo qaybshay gacan ku hayayaasha naadiyada isboortiga iyo nashaadayada carruurta. Macluumaadkan waxa dhawaan wax ku daray khubarada badbaadadda ilmaha oo gaar ahaan waalidka, daryeelayasha ku wajahan, sidaas oo kale.
Tilmaanta Badbaadda Ilme ee buugyarahani xanbaarsanyahay waxaa loo qorsheeyey inuu kaa caawiyo inaad aamin dheeraad ah dareentid oo aad carruurtaada dhibta ka ilaashatid. Sida badbaadadda jidka, waxaad xeerarkaas yaryar ka dhigi kartaa qayb nolosha qoyskaaga ka mid ah.

2 Ku xadgudubka ilmuhu waa maxay?

Dadka carruurteena daryeela badankoodu waa kuwo aamin ah. Laakiinse, nasiib xumaan, dadka waaweyn qaar baa aad xirfadyaqaan ku ah la saaxiib noqoshada ciyaalka iyagoo damacsan inay dhaawacaan.
Xaaladdu waxay ka dhici kartaa meel kasta – qoyska gudihiisa, iskoolka, isboortiga iyo meelaha nashaadyada kooxeed carruureed ee kale. Runtii inta ugu badan kiisaska lasoo sheego waxay muujinayaan in ilmaha qof qoysku ka mid ah ama yaqaan ku xadgudbay.
Waxay loo yaqaan "Grooming" ama carruur ugaadhsade waa erey-bixin loo adeegsado ilme ku xadgubha (paedophile) gaar ahaan kolkay rabaan inay la

sidiiqaan ama kalsooni ka helaan ilmaha (carruurta) ama waalidkood. Habkan, ugaadhsi, ayaa sida loo yaqaan, u sahasha ciyaal ku xadgudbaha inuu carruurta fursad u helo ama meel gooni ah la galo isagoo qasdi gaar ah ka leh (sida rabitaan ku xadgudubka ilmahaas).

Ku xadgudubkan, ilma ugaadhisi, wuxuu ku dhici karaa saacado, maalmo, usbuucyo, billo ama sanado taas oo ku xidhan liidnaanta ilmaha iyo fursad u helitaanka qafkaas weyn. Ilmo ugaadhsigaas, wuxuu ka dhalan karaa la saaxiibka, taas oo fursad u siinaysa, ay ku xigto tijaabinta xuduudka ilmaha. kalsoonida, iyo feejignanta ilmaha ama qofka dhalinyarta ah waxay noqon kartaa mid qayb ka ciyaarta ka hor-istaaga dhicitaanka ficilkaas xadgudbaha oo kale. Xadka ilmaha waxaa lagu tijabin karaa qaabab badan, sida taabashada, dhunkashada iyo la hadalka. Tusida ama u fasaxa carruurta daawashada aflaamta xun ama ta fiidyowga ku duuban, waa qaabab kale oo ilmaha xadkiisa ku xadgudbuhu ku baadho ka dibna gaadhsiyo inuu ku xadgudbo.
Intaas waxa u dheer, imanka waxa habkaas ilma ugaadhsi noqday mid soo hoos gelaya , Xeerka Xadgudubka Jinsi (Galmo) 2003,. Xeerku wuxuu qirayaa in carruurtu dadka la shaqeenaya khatar kaga sugnaan karaan ama kuwaas boos lagu kalsoon yahay fadhiya. Wuxuu si cad u qeexayaa xadka iyo xuduudaha ee habka carruurta loola dhaqmo. Qaybta 15-aad ee Xeerku wuxuu sheegaa haddii qof ka hooseeya da'da 16 jirku ugu yaran laba jeer (ay ka mid tahay wadahadalka telfoon iyo ka internetka lagu qaato); waa denbi la kulankoodu, ama u socdalka la kulankoodu, meelkasta oo adduunka ka mida ah, iyadoo qasdigu yahay samaynta xadgudub hoos imanaya Xeerkaas. Xadgudubkaasi waa mid nooc ahaan jinsi (galmo) la nooc ah ama keena.Tusaale, ahaan ogaan u daawasiinta ilmaha cid kaloo – xaalad galmo – samaynaya ama ha noqoto mid markaas dhacaysa ama mid filim ku jirta , iyagoo ku raaxysigooda galmo u adeegsanaya, taasi wa denbifal. Ilme ka qayb gelinta dhacdo galmo waa denbi ku jira isna. Xeerka waxa soo hoos galaya, dadka denbi ka gala carruurta, carruurtaas oo 13 jir ka hooseeya waxay maxkamadda ka qaadan doona xabsiyayno adag.

Waxaa jira noocyo fara badan oo ilmo ku xadgudub laakiinse waxay hoos yimaadaan afar qaybood:

Xadgudubka galmo
Ku xadgudbayaasha galmada, kuwaas oo badanaa lab ah laakiinse aan ku koobnanyn, waa kuwo heer kasta oo mujtamacu yahay laga helo waxyna ka yimaadaan dhinac kasta oo bulshada ka tirsan. Badanaa waxy qabtaan goobo iyo mihnado u sahlaya fursad u helitaanka caruurta ay ka mid tahay:

- Hogaamiyaha nashaadyada kooxda carruurta
- Isboorti bare ama wakhti ku taburuce dhinica carruurta
- Shaqaale ka mid ah kuwa iskoolka
- Xubin ka tirsan xirfad-yaqaanka daryeelka

Ku xadgudubka galmo ee carruurta waxaa ka mid ah ka u galmoodka, hamad ka keenka, mid aalada galmo iyo afka loo adeegsado, farafarayn iyo mararka qaarkood mid taa-taabasho aan habboonayn ah.

Ku xadgudubka muuqda / jidh ahaan

Carruurta waxyeelo ku timaado ama dhaawacma ama muujiya muuqaal nabaro aan caadi ahayn, waxaa laga yaaba in jidh-dil lagu sameeyey. Xadgudubka noocaas ah waxa kaloo ka mid ah carruurta in la siiyo khamari iyo mukhaadaraad. Calaamadaha ay tahay in loo fiirsado waxaa ka mida ah isbeddel ku yimaada habdhaqanka ilmaha iyo akhlaaqdooda, dib-isu-gala kolka qof weyni ka ag dhawaado, oo ku eekaado xaalad is-ilaalis ah ama u muuqda mid cabsi ku jira oo is urrurinaya ama is-beddel dhakhsa ah oo muuqaalka ku yimaada.

Dayacaad

Tani waa marka qof weyni uu kasoo bixi waayo buuxinta baahiyaha asaasi ee ilme, sida cunto, lebis diiran ama uu u fidin waayo daawen ku habboon. Tan waxaa kaloo ka mid ah kaga tegida carruurta yar yar iyo kuwa liita hoyga gudahiisa. Dayacaadu waxay kaloo dhici kartaa xilliga nashaadyada la qorsheeyey dhacayaan haddii carruurta yar loo dayaco khatarta dhaawicida ama ay jirto kasoo bixi waa dhinaca badbaadadooda iyo caafimaadkooda. Tan waxaa kaloo ku jira kaga taga carruurta liita gudaha guriga iyo debediisa keligood
Dayacaadda waxay kaloo ka dhici kartaa inta lagu jiro nashaadyada la qaban qaabiyo ama ay dhacdo dayacaad ku timid badbadintooda iyo caafimaadkooda.

Xadgudubka caadifadeed

Xadgudubka noocan ah waxaa ka mida ah si is-dabayaal ah ilmaha u markinta si-xun-ula-dhaqanka caadifadeed, handidaadda ama ogaan isu-diidsiinta. Dhammaan xadgudubyada waxay wataan nooc si-xun-ula-dhaqan tan waxy ahaan kartaa mid qaab habaysan iyo xaaladaha keligood ku dhaca. Waxay kaloo ka mid ahaan kartaa guryaha ay dagaal guri ka dhaco ama heer waalidnimo aan hobboonayn laga filaayo.
Carruurta iyo dhalinyarta (gaar ahaan kuwa ordaa heersare ahi) isboorti kastaba ha ahaadee, waa waalidiintu iyo daryeelayashu ilaashaan wixii dabeecado isbeddel dheeraad ah.
Hab-dhaqamada xadgudub ee dadka waaweyn ku kacaan waxa lagu magacaabay sida quudhsi, meel kadhac, ku qaylin, dulmi, cidlayn, nooc kastoo takoor, hanjabaad iyo iska dhegatir. Taasi waxay keensan kartaa aakhirka in carruurtu dareento inay yihiin nacas, qiimo lahayn, cadhaysan, la bahdilay, murugaysan, cabsi badan oo xanaaqsan.*(waxaa yidhi M. GERVIS and N. DUNN.The Emotional Abuse of the Elite Child Athletes by Their Coaches 2003)*

Qaab ula-dhaqanka ilme ee badbaadada wata

Xasuusnow inay muhiim tahay xisaab ku darsiga ku xadgudubka ilmahu:

- Dadka waaweyn badankoodu weligood ilme wax ma yeelaan.
  Carruurta waa in loo ogolaadaa inay madax bannaanadan oo is ilaalin karaan – looma baahna in si xaddhaaf ah la isu yidhaah u qarsha.

3 Sidaan ku garan karaa haddii ilmahaygu yahay mid lagu xadgudbo?
Ku xadgudubka ilme waa mid ku muuqan kara dhinac jidheed, mid caadifadeed iyo calaamado daawo. Ilmahaagu wuxu kaloo kuu sheegi karaa dhinacyada xadgudub si uu dareenkaga u eego. Waxa laga yaabaa inay tusaale ahaan in loo sheegay inay sir ilaashaan. Halkan waxaa ku taxan dhawr ka mida ah calaamadaha ugu badan ay tahay inaad ilaalaysid.:

- Nabaro aan la garan ama dhaawac aan la daaweyn
- Ka cabasho xanuun calool oo joogta ah ama mid jidh iyadoo wax jawaab daawo ahi jirin.
- Hab-dhaqan dagaal ama mid diidmo oo aannu doonayn ka hadalka dhaawaca.
- Diidma tegetaanka iskoolka ama si xun wax u dhigashada kediska ah.
- Diidmada ka qayb qaadashada nashaadyada iskool ee caadiga ah.
- Ka cabsaho aan la filayn oo dadka waaweyn ah iyo sasida marka la taabto
- Hab-dhaqanka ama luqada u galmoodka iyo jinsi
- Lacag aan lagarayn meel ay ka soo gashay.
- Is-beddelo muddo dheer dhaca iyo soo bax muuqaal sida miisaan dhac, is-wasakhayn

Waa muhiim in laga feejignaado calaamadaha xadgudubka. Hase ahaatee, marka ilmahaagu muujiyo dhammaan calaamadahan ama qaar ka mid ah, qasab maaha inay yihiin kuwo xadgudub qaba. – waxaa jiri kara asbaab kale. Sidoo kale astamahaas oo dhan baa la waayi karaa, laakiinse waxaad dareesantahay in wax qaldan yihiin.
Waa inaad kalo ogataa cidii qof da' weyn ah ee fiira gaar ah ilmahaga saarta – tani waa calaamad macruuf ah oo ku xadgudbe ciyaal. Tusaale ahaan:

- Bixinta hadyado, shay dheelis ama wax ay jecelyihiin
- Ku weydiinta inay ilamahaga fasax u saaraan
- Eegashada fursadaha ay ilmahaaga kula keliyeystaan

4 Maxaan qaban karaa si aan carruurtayda u badbaadsho?
Wiilasha dhalinyarta ah iyo habluhuba waxay khatar u noqon karaan xadgudubka ilme, sidoo kale dhalinyarta aan qangaadhin. Waalidiinta, mas'uulid qaadaha ama daryelayaasha waxay ka caawin karaan dhimista qaar ka mid ah khataraha

ku iman kara iyagoo dhaqan-gelinaya qaar ama dhammaan hab-badbaadiska ilme ee soo socda.

Markasta:

- Ogow meesha carruurtaadu jirto
- Ogow ciday la joogaan
- Ogow goortay ku soo guryo laabanayaan
- Hubi in carruurtaadu ogtahay halkaad joogtid iyo siday kuula soo xiriiraan
- Si wacan u dhagayso waxay ka cabanayaan una caqli celi in la dhagaysan doono

Waxaad kaloo ay tahay in aad carruurtaada bartid:

- Kala ogaanshaha taabshada habboon iyo ta aan habboonayn. Haddayna kala hubin ku dhiirrigeli inay kaala hadlaan.
- Kala barashada shayga sirta ah ee ‘dheelis ahaan ’ loo hayo iyo ka aan ‘sirta’ cabsi gelinaysa aanay ku faraxsanayn. Dahsoonan u haynta xaflad dhlasho waa okay, laakiinse maaha in cidina weydiiso inay ka aamusaan taabashada siriga ah.
- Samaysada kelmad siri ah ‘ilmuhu ku badbaado’ haddii cidi istidhaah soo kaxeeya – oo aan kelmadaas ayna garan, yeyna raacin! U soo iibinta ilmahaaga kaarka socdaalka ama kaarka telefoonka macnaheedu waa u suurtgalka inay markasta kula soo xidhiidhaan iyadoo cidi caawin.
- Inay kalsooni ka qabaan diidmada shay kasta oo ay u arkaan inuu yahay qalad ama cabsi gelis oo ay kuu sheegaan cidkastoo taabata haba yaqaniin oo u tabaata si baqdin gelisa ama dawakhisa. ***Ciyaal ku xadgudbayasha badankoodu waa kuwo aan qaalaad ahayn.***
- Weligaa hakalu socodsiiyaan haddii wax xumi ku dhaceen – xitaa hadday xeer jabsheen – waanad furdaamin doontaa. Carrurtu badanaa xadgudubka ku dhaca waxay u qariyaan waayo waxay ka cabsanayaan inay dhib u keento.
- U sheeg haddii cidi is-tidhaah taabta ama qabsada inay qayliyaan “NO” una carraraan sida ugu dhakhsaha badan. Ka dibna ama adiga ama qof kaloo weyn u sheegaan.

Xasuusnow – ku hubsashada ilmahaga badbaado waa shayga ugu muhiimsan – xeer jebinta ka dhalata ilaalinta ilmahaaga waa okay.

- waa shay markasta muhiim ah inaad ahaatid qof madax furan oo ilmhiisi dhagaysta.

Ka qayb noqoshada naadiya ama kooxaha
Ka hor intaannu ilmahaagu naadi ama koox ka mid noqon, ama ka hor intaadan u dirin nooc kastoo kale oo nashaad ah waa in nuqdadahan maskaxada lagu hayaa:

- Waalidiinta kale kala hadal khibrada ay u leeyihiin kooxda – ma ku kalsoon yihiin in carruurtoodu gacmo aamin ah ku jiraan?
- Weydii shaqaalaha ama mutadawiciinta hadday yihiin kuwo boolisku xaqiijiyey iyo intee in leeg bay naadiga ama kooxda ku jireen.
- Booliska ama kawnsalka warso inay wax calaaqa ah kooxda la leeyihiin.
- Kooxdu ama naadigu mid bulshada ka dhex caan ah ma yahay? Intay jirtay? Ma tahy mid macruuf ku ah iskoolada, xarumaha caafimaad iyo adeegyada dhalinyarta iyo bulsheed?
- Waydii imasa qof oo weyn ayaa carruurta sii ilaalaynaya oo marnaba qof weyn oo keliya yaan keligii weydii inaan lagaga tegin ?
- Qaabkee weeye dharbeddelashadu iyo musqulayntu?
- Kooxdu in waalidiintiu ka qayb qaadato ma ku dhiirrigelinysaa?
- Kooxdu masoo saartay siyaasad qoran taas si cad u qeexaysa waajibka ka saaran ka badbadinta carruurta ku xadgudubka? Maka qayb baa kooxda ra'iisiga ah ee xeer badbaadis ilmo oo qeexan wata? Ma sheegtaa shahaadooyinka iyo mas'uuliyadaha shaqaale iyo samafalka? Ma jiraa kalkaaliye haddii wax dhacaan tababar u qaatay?

Haddad cid waalidiinta kale ka mid ah si wacan u taqaanid, hawlahaas qaar ka mid ah baa la wadaagi karaa. Haddaad weli shaki qabtid Adeega Daryeelka Buklsho la xiriir. Ama hay'adaha daryeel ee buugyarahan dhammaadkiisa ku taxan.

Marka ilmahagu kooxda galo . . .

- Kaalay muddo ilaa muddo si aad u aragtid si wax u socdaan
- Ilmahaaga waxyaalha la qabanayo kala hadal oo si fiican u dhagayso hadduu ilmahagu qasab ku tahay tegitaanku waalidka kale u tag.
- Waalidka kale la hadal

5 Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu ii shiigo inuu yahay mid lagu xadgudbay?

- Waxa ugu muhiimsani waa inaad is-dejisid oo aad dhegaysatid.
- Waad murugoon doontaa – ha u dhaqmin hab ilmahaga cadhadiisa sii kordhisa. Hana maagin, haddii xadgudubkaasi ku dhacay maqal waagaagga awgii.
- Hubi in ilmahaagu ogyahay inaad rumaysantahay, oo aany canaan ku lahayn. Waxa dhacay.

- U dhaaf ilmahaagu inuu sheego inta ugu badan am yar uu rabo inuu sheego. Ha isku dayin inaad warbixin ka badan tuu hayo aad ka heshid.
- Soshiyaalka ama booliska cabsidaadda kal xiriir.
- Ogow in sooshiyalka iyo booliskuba aad u carbisanyihiin oo cabsidaadda si txadirle ula dhaqmi doonaan.

Haddaad tuhuntid in ilmahaagu yahay mid lagu xadgudbay waxaad dareemi-doontaa cadho badan waxaanad u xanaaqi kartaa qof aad ku kalsoonayd.
Ha waajihin qofkaad tuhmaysid, taageero raadso oo cabashadaadda sheeg. Waxaa jiri kara hay'ado tiro badan oo dadk caawiya wakhtigaas adag.

Xasuusnow – Tilmaamahani waa kuwo ku sabsaaban ku oganshahaaga dareen degen oo ilmahaaga xagiisa ah. Dadka waaweyn badankoodu maaha qaar ku xadgudba ciyaalka sidaas awgeed ha noqon mid cabsi badan – ama carruurtada cabsi gasha – ha ka badbadin.

Adoo raacaya warbixinta buugyarahan ku jirta iyo macluumaadkas waxaa caawin doontaa badbaadinta carruurtada goortay ka qayb qaadanayaan nashaadyada dhalinyarta una suurtogelinaya madax bannaani iyo kalsooni.

6 Xirfad-yaqaanda aaga ee lala xiriiro

[Kooxda Badbaadinta Ilmaha ee aaga Bristol]
Avon and Somerset Constabulary Child Protection Team – Lockleaze (Greater Bristol
Area) –
Tel: 0117 945 4320
Avon and Somerset Constabulary Child-Safe Team – Police Headquarters
Tel: 01275 816131
[Adeega Daryeelka Bulsho , waajibka ilmaha iyo kooxda qiimayn qaadka]
Bristol Social Services Child Care Duty and Assessment Teams
Central – Tel: 0117 903 6500
North – Tel: 0117 903 8768
South – Tel: 0117 353 2200
East – Tel: 0117 955 8231
Social Services Emergency Duty Team (out of hours, weekends and public holidays)
Tel: 01454 615165
[Adeeggyada Dhalinyarta ee Bristol]
Bristol Young People's Services
Tel: 0117 353 2277
Childline [Khadka telefoon ee ilmaha]
Tel: 0800 1111
www.childline.org.uk

Barnardos [Hay'ad carrurta la shaqaysa]
Tel: 0117 941 5841
www.barnardos.org.uk
www.barnardos.org.uk/resources/resources_links.htm

Kidscape [Hay'ad carruurta la shaqaysa]
152 Buckingham Palace Road, London, SW1W 9TR
Tel: 020 7730 3300
www.kidscape.org.uk

[Hay'ada Samafalka Carruurta]
NCH the children's charity – Tel 0117 935 4440
www.nch.org.uk

NSPCC (National Society for the Prevention of Cruelty to Children)
Helpline Tel: 0808 800 500 (24 hours a day)
email: help@nspcc.org.uk
www.nspcc.org.uk
[Majliska xaafadda ee danaha crruurta]
Local Safeguarding Children Board
www.everychildmatters.gov.uk

Asian Helpline Service (1.00am to 7.00pm)
Tel: 0800 096 7719

Helpline for Deaf [Gargaarka dhegoolayda]
Tel: 0800 400 222
Monday – Friday 9.30am – 9.30pm

Sabti iyo Axada 9.30am / subaxii– 8.00pm/fiidkii

Fadlan la xiriir dadkaas iyo hay'adahaas markaad caawimo ama talo-bixin u baahatid. Tafaasiisha lagala xiriiro meel kaydsan u hayso oo si sahlan loo helikaro. Si aad u heshid liistihii ugu danbeeyey fadlan aad www.child-safe.org.uk oo xulo bogga Bristol.

Wixii warbixin dheeraad ah ee adeegyada aaga fadlan kal bax bogga internetka Dawladda Hoose Bristol – www.bristol-city.gov.uk

Mahadnaq:
The Charity Kidscape, ayaa di ay ku mahadsantahayh noogu fasaxday qaar ka mid ah warbixinteedii asalka ahayd ku darista buugyarahan.

Warbixinta buugyarahan ku taal qaar ka mid ah ayaa galmo si cad uga hadasha. Some Waalidiintu waxay u arki karaan inaanay akhriskiisu carruurta ku habboonayn.

Income from the sale of the Child-Safe information pack will help fund further crime prevention initiatives.

ENGLISH

If you would like this information in a different format, for example: Braille, audio tape, large print, computer disk or community languages, please contact: Susan Martell, Tel: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

ALBANIAN

Në qofte se doni të perkthyer ose format të ndryshem, për shembull, Braille, audio kasete, print më të madh, kompjuter disk ose në gjuhen e komunitetit ju lutem kontaktoni Susan Martell, Tel: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

BENGALI

আপনি যদি এই তথ্যাবলী বিভিন্ন রূপে চান, উদাহরণস্বরূপ : ব্রেইল, অডিও টেপ, বড় প্রিন্ট, কম্পিউটার ডিস্ক বা গোষ্ঠীগত ভাষাগুলিতে, তাহলে অনুগ্রহ করে এঁর সাথে যোগাযোগ করুন : Susan Martell, টেলি : 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

CHINESE

如果你需要以不同形式取得這資料,例如,盲人凸字,聲帶,大號字,電腦碟或社區語言,

請聯絡: Susan Martell (譯:麗祖威廉絲), 電話: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

GUJARATI

જો તમને આ માહિતી બીજા સ્વરૂપે જોઈએ, દાખલા તરીકે: બ્રેઈલ(અંધ લિપિ)માં, ઑડિઓ ટેપ પર, મોટા અક્ષરે, કોમ્પ્યુટર ડિસ્ક પર કે બીજી કોઈ ભાષાઓમાં જોઈએ, તો મહેરબાની કરીને સંપર્ક કરો: Susan Martell, ટેલી: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

HINDI

यदि आपको यह जानकारी किसी और रूप में चाहिये जैसे कि: ब्रेल, औडियो टेप पर, बड़े प्रिन्ट में, कम्प्यूटर डिस्क पर य समुदायिक भाषाओं मे, तो कृपया संपर्क करें: रेचल विलियम्ज़ Susan Martell से, टैलिफोन नम्बर: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

KURDISH

نووسینی نابیناکان)، لەسەر شریتی دەنگ، بە چاپی پیتی گەورە، لەسەر دیسکی کۆمپیوتەر، وە یاخود بۆ زمانێکی تر وەربگێڕدرێت (تەرجومە بکرێت)، تکایە لەسەر ژمارە تەلەفۆنیئەگەر دەتەوێت ئەم زانیاریانەت بە شێوازێکی تر بۆ دابین بکرێت، بۆ نموونە بە بریل (شێوازی 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation پەیوەندی بە Susan Martell (ڕەیچڵ ویلیەمس) بکە.

PUNJABI

ਜੇਕਰ ਤੁਹਾਨੂੰ ਇਹ ਜਾਣਕਾਰੀ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਢੰਗ ਵਿੱਚ ਚਾਹੀਦੀ ਹੋਵੇ, ਉਦਾਹਰਣ ਦੇ ਤੌਰ ਤੇ, ਬਰੇਲੀ, ਸੁਨਣ ਵਾਲੀ ਟੇਪ, ਵੱਡਾ ਛਾਪਾ ਜਾਂ ਕੰਮਪਿਊਟਰ ਡਿਸਕ ਜਾਂ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਕੰਮਿਊਨਿੱਟੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਚਾਹੀਦੀ ਹੋਵੇ, ਤਾਂ ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ Susan Martell ਨੂੰ 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation ਤੇ ਸੰਪਰਕ ਕਰੋ।

SOMALI

Hadii aad rabto warkan oo si kale u yaala, sida isagoo ku duuban cajalad maqal ah ama cajalada koombiyuutarka ama ku qoran far waaweyn ama farta indhooleyaasha (Braille) ama ku qoran afkale fadlan lasoo xidhiidh Susan Martell, Tel: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

URDU

اگر آپکو مختلف شکل (فارمیٹ) میں ترجمہ چاہیئے ہو، مثال کے طور پر بریل، آڈیو ٹیپ، لارج پرنٹ، کمپیوٹر ڈسک، یا کسی اور کمیونٹی کی زبان کی صورت میں درکار ہو تو براہ مہربانی ریچل ولیم (Susan Martell) سے 0117 353 2275 نمبر پر فون کر کے طلب کریں۔ www.childsafe.org.uk/guidetranslation

VIETNAMESE

Nếu quí vị muốn lấy tài liệu này trong một hình thức khác, ví dụ, bằng chữ nổi, thu băng, in nét lớn hay đĩa compíutơ, hay bằng bất cứ một ngôn ngữ cộng đồng nào, xin liên lạc với Susan Martell, số điện: 0117 353 2275 / www.child-safe.org.uk/guidetranslation.

Child-Safe International Ltd, Avon and Somerset Constabulary,
PO Box 37, Valley Road, Portishead, Bristol BS20 8QJ
Tel: 01275 816133/816596 Fax: 01275 816655
Charity Number: 1105726

www.child-safe.org.uk